

(IMF) ayaa sheegtay in dowladda Soomaaliya ay horumar ka samaysay dhanka maareynta maamulka maaliyadda 2015-06-20

Wasiirka Maaliyadda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya mudane Maxamed Aden Ibaraahim Fargeeti, Wasiir ku xigeenka Qorshaynta mudane Cabdullahi Shiekh Ali iyo Gudoomiyaha Bangiga Bashiir Ciise, Saraakiil sare oo ka tirsan XFS ayaa kulan la qaatay wafti ka socoday Hay'ada Lacagta Aduunka "IMF". Kulanka oo noociisa markii ugu horaysay la qabtay mudo 25 sano ah ka hor, iyadoona Hay'adu qiimayn ku waday mudooyinkan habka uu u shaqeeyo nidaamka maaliyadeed ee dalka xaalada guud ee dhaqaalaha dalka.

War saxaafadeed ay soo saartay Hay'ada Lacagta Aduunka "IMF" ayaa ku soo bandhigeen horumarada ay dowladda Soomaaliya ka samaysay dhanka maareynta maaliyadda labadii sano ee la soo dhaafay, kobaca dhaqaale ee dalka iyo caqabadaha haysta miisaaniyadda dowladda sanadkan 2015.

"Laga soo bilaabo sanadkii 1991-kii Soomaaliya waxaa dhibaatooyin balaaran ka haysteen dagaalo sokeeye, dhaqaalo xumo ka sii daraysa, bur bur muuqda oo soo gaaray kaabayaasha dhaqaalaha, waxaana dagaaladaas sababeen nolol xumo soo wajahday shacabka Soomaaliyeed, hadaba Soomaaliya waxay u baahan tahay in beesha caalamku ka caawiso dhanka maaliyadda iyo in laga caawiyo kor u qaadida tayeeynta haya'adaha dowlada" ayaa lagu yiri warsaxaafadeedka.

"Iyadoo xaalada siyaasadeed iyo mida nabad galyo wali ay yihiin kuwo soo kabanaya, hadana Soomaaliya waxaa laga sameeyey horumar balaaran ilaa iyo intii la soo celiyey xiriirkii ay dowladda Soomaaliya la leedahay IMF 12 April 2013, Hay'aduna waxay si muuqata ugu diyaarisay caawin dhanka farsamada ah iyo kala talin dhanka siyaasadda dhaqaalaha, waxaana diyaar u nahay inaan joogtayno gacan siinta dowladda Soomaaliya"

"Dowladu waxay qaatay talaabooyin muhiim ah oo dib habayn loogu samaynayo horumarka dhanka dowlad wanaagsan, taas oo ay ka muuqato isla xisaabtan dhanka Hay'adaha dowladda, waxayna muhiimad gaar ah u leedahay in dib loo soo celiyo kalsoonida shacabka. Soomaaliya waxay leedahay kheyraad balaaran oo dabiici ah, hadii si wanaagsan loo maamulo wuxuu wax weyn ka tarayaa nabada iyo barwaaqo la gaarsiiyo dalka. Soomaaliya sidoo kale waxay u baahan tahay is faham ku tacaluqa nimaad maaliyadeed oo heer federaal ah, oo ay ka muuqato masuuliyadda ku aadan in adeega la gaarsiinayo dadka, aruurint dakhliga gudaha iyo in si siman loo qaybsado" ayaa lagu yiri war-saxaafadeedka.

War-saxaafadeedka ayaa sidoo kale lagu sheegay in Miisaaniyadda Dowladda Sandkaan 2015, la diyaarshay iyadoo aysan jirin waxa keyd ah, waxaana lagu saleeyey rajo laga qabo deeqaha dibadda iyo in dakhli fiican laga soo xareeyo gudaha. Dakhliga gudaha laga filayey oo yaraaday, kharashaadka baxaya oo kordhay, iyo beesha caalamka oo ka gaabisay balan qaadkii ay ku kabayeen miisaaniyadda dowlada ayaa horseeday caqabado dhanka dhaqaalaha ah, waxayna sababtay in kharashka dowladda la beekhaamiyo.

Ugu danbayntii IMF ayaa sheegtay in dhaqaala xumada ka jirta dalka ay qayb ka tahay lacagtii shilin Soomaaliga oo meesha ka sii baxaysa iyo isticmaalka Doolarka oo aad u badanaya, taas oo sababtay dadka danyarta ah ineysan awoodi hiltaanka doolarka, si kastaba ha ahaate in lacag la soo daabaco waxaa ku imaan kara hakad ilaa laga helayo shuruudaha loo baahan yahay, waxayna IMF diyaar u tahay iney Soomaaliya ka caawiso sidii loogu guulaysan lahaa dib habayn lagu sameeyo lacagta Shilin Soomaaliga ah.

F/G Fadlan kala baxa warsaxaafadeedka IMF oo English lifaaqa hoose

<http://www.imf.org/external/np/sec/pr/2015/pr15278.htm>